Somali

# Ogolaanshaha wargashan ee daryeelka caafimaadka

## Waa maxay ogolaanshaha wargashan ee daryeelka caafimaadka?

Adeegyada caafimaadka ayaa ku caawin doona markii aad xanuunsan tahay ama aad qabto dhibaato caafimaad. Mararka qaarkood waxaad u baahan tahay baaritaano ama daaweyn caafimaad. Shaqaale caafimaadka ayaa ku weydiinaya haddii aad ogoshahay inaad qaadato baaris ama daaweyn. Ogolaanshaha wargashan waa markii aad si qeexan u fahamto xanuunkaaga ama dhibaatadaada caafimaad aadna ogolaato waxa uu shaqaalaha caafimaadkaaga uu samaynayo.

Waa inaad garanayso doorashooyinka daryeelkaaga caafimaad ka hor intaadan ogolaan. Waxaad dooran kartaa inaad daaweyn qaadato iyo in kale.

## Waa maxay macluumaadka aan u baahanahay?

Shaqaalaha caafimaadkaaga ayaa ku siin doona macluumaad si ay kuugu caawiyaan inaad samayso go'aan ku saabsan baaristaada ama daaweyntaada.

Waxaad kaloo weydiin kartaa Shaqaalaha caafimaadkaaga su'aalo sida:

- Waa maxay xanuunkaygu ama dhibaatadayda caafimaad?
- Waa maxay baaristu ama daaweyntu?
- Sidee bay baaristu ama daaweyntu ii-caawin kartaa?
- Baaristu ama daaweyntu ma ii-keeni karaan dhibaatooyin?
- Sidee bay u darnaan kartaa dhibaatadu?
- Miyey jiraan baaritaano ama daaweyno kala duwan?
- Maxaa dhacaya ka dib baarisyada ama daaweynaha?
- Miyaan ka fiicnaanayaa sidan?
- Imisa ayey qaadanaysaa inaan ku bogsoodo?
- Maxaa dhacaya haddii aanan helin daaweyn?

U-sheeg shaqaalaha caafimaadkaaga haddii aadan wax fahmin.

## Maxay tahay sababta aan ogolaanshaha u bixinayaa?

Halkan Australia, waa sharci in shaqaalaha caafimaadkaagu uu haysto ogolaanshahaaga ka hor intaysan ku siin baaritaanada iyo daaweynta.

## Waa maxay sababta aan ugu baahanahay inaan saxiixo foomka ogolaanshaha?

Waxaa lagu weydiin doonaa inaad saxiixdo foomka ogolaanshaha wixii daaweynaha halista sare leh sida qalliinka. Waqtiyada kale waxa keliya oo aad u baahan tahay inaad shaqaalaha caafimaadkaaga u sheegto inaad ogoshahay. Shaqaalaha caafimaadka oo keliya oo ku howllan baaritaanadaada ama daawyntaada ayaa aqrin doona foomka ogolaanshahaaga.

Foomkaaga ogolaanshaha lalama wadaagayo cidaan ku howlanayn daryeelka caafimaadkaaga.

## Kumaa bixin kara ogolaansho?

Haddii aad fahmayso khayaarada daaweyntaada aadna u sheegi karto shaqaalaha caafimaadkaaga waxaad doonayso, markaas waa adiga kan go'aanka gaarayaa. Waxaad ballantaada usoo wadan kartaa saaxiibo, xubnaha qoyska ama bulshada waxaadna ka codsan kartaa wixii talooyin ah. Mararka qaarkood shaqaalaha caafimaadkaaga, xubinta qoyska ama saaxiib ayaa go'aanka kuu samayn kara haddii wax degdeg ah jiraan.

## Kumaa bixiya ogolaanshaha ilmaha?

Badanaa, waalidka, ilaaliyaha ama daryeelaha ayaa bixiya ogolaanshaha ilmaha ka yar da'da 18 sano. Haddii ilmahu uu si buuxda u fahmayo daaweyntooda iyo saamaynta ay ku yeelan karto caafimaadkooda, waxay bixin karaan ogolaansho. Shaqaalaha caafimaadka ayaa hubin doona haddii ilamahu uu awoodo inuu bixiyo ogolaanshahooda.

## Ilaa imisa ayaan u baahanahay inaan ogaado?

Shaqaalaha caafimaadka ayaa ku siin doona intii macluumaad ah oo aad doonayso. Waxay isku dayi doonaan inay ka jawaabaan dhammaan su'aalahaaga oo dhan. U sheeg shaqaalaha caafimaadka hadduu jiro wax aadan doonayn inaad ka ogaato baarisyadaada ama daaweyntaada.

## Ilaa intee waqti ah ayey tahay inaan go'aan ku gaaro?

Go'aanada waa in si dhaqso ah loo sameeyaa markii degdeg jiro Haddii uusan jirin wax degdeg ah, waxaad qaadan kartaa waqti dheer oo aad go'aan ku gaarto. Haddii aadan weli hubin wax ku saabsan baarisyadaada ama daaweyntaada, waxaad kala hadli kartaa shaqaale caafimaad oo kale si uu kuugu caawiyo go'aankaaga.

Interpreter

## Turjumaan miyaan u baahanahay?

Way adkaan kartaa in la fahmo baaritaanada ama daaweynaha caafimaad. Si loo sameeyo go'aanka ugu fiican, waxaa muhiim idiin ah adiga iyo shaqaalaha caafimaadkaaga inaad is-fahamtaan. Haddii Ingiriisigu uusan ahayn luqaddaada kowaad, turjumaan xirfad-yaqaan ah ayaa iman kara ballantaada. Turjumaannada fool-ka-foolka ah ama turjumaanada taleefanka ah waa lacag la'aan. Adiga iyo shaqaalaha caafimaadka ayaa codsan kara turjumaanka inuu kula joogo markaad ka hadlayso wax ku saabsan daryeelka-caafimadkaaga. Macluumaadka aad u sheegto turjumaankaaga waxaa loo hayn doonaa si gaar ah.

## Maxaa dhacaya haddii aan ogolaansho bixiyey ka dibna aan baddelo maankayga?

Mar kasta waxaad baddeli kartaa maankaaga, xataa haddii aad saxiixday foomka ogolaanshaha ama aad u sheegtay shaqaalaha caafimaadkaaga inaad ogoshahay baarisyada ama daaweynta.

## Xusuusnow

### ◊ Su'aalaha weydii

Waxaa muhiim ah inaad fahamto wax kasta shaqaalaha caafimaadkaaga uu kuu sheegay. Waxaad weydiin kartaa su'aalo badan intii aad doontaba. Waxaad soo wadan kartaa qof ku taageera.

### ◊ Codso turjumaan

Turjumaanada xirfad-yaqaanada ah waa lacag la'aan. Waxay kuu fududeeyaan adiga iyo shaqaalaha caafimaadkaaga inaad is-fahamtaan.

### ◊ Waa wax khuseeya doorashadaada

Xataa haddii aad ogolaansho bixisay, waxaad baddeli kartaa maankaagii mar kasta.

Partnering with Consumers - This patient information brochure
supports National Safety and Quality Health Service Standard 2 (2.4.1)
Consumers and/or carers provided feedback on this patient information.

This document has been reproduced with the permission of Metro South Hospital and Health Service.

Somali informed consent
Effective: 10/2016